AUSCO

Barnaamijka Tilmaan-siinta Dhaqaneed ee Australia

# Dulmarka Australia



## Luqadda

Ingiriisigu waa luqadda qaranka Australia. Barashada ingiriisigu waxay muhiim u tahay si guul ah u-degidda Australia. Si kastaba ha ahaatee, in ka badan 200 luqadooda ayaa looga hadlaa guryaha iyo bulshooyinka Australia oo dhan ah. Taasna waxaa u sabab ah ugu yaraan boqolkiiba 25 dadweynaha Australia ayaa ku dhashay waddan kale, waxaa kale oo jira in ka badan 20 luqadaha asaliga ah oo weli looga hadlo Australia.

## Dadka asalagi ee Australia

Dadka Aboriginal iyo  Torres Strait Islander waxay ku noolaayeen Australia ilaa 50,000 sano waxayna ka mid yihiin dhaqamada ugu faca weyn adduunka. Dadka Indigenous Australians waxay ku nool yihiin dowlad-goboleed iyo taritoriga kasta oo Australia ah. Dadka Aboriginal and Torres Strait Islander waxay leeyihiin luqado, dhaqamo iyo caqiidooyin ruuxi ah oo kala duwan  oo ay ku leeyihiin meelo kala duwan oo Australia ah.

## Australia Dhaqamada-badan

Australia waxay leedahay dad soogalooti ah oo ka kala yimid adduunka oo dhan. Ilaa 1945, in ka badan 7.5 malyan dad ah ayaa usoo haajirey Australia, oo ay ku jiraan 800,000 oo qaxooti ah.

Boqolkiiba afartan iyo lix dadka Australia waxay ku dhasheen waddanka dibadiisa ama waxay leeyihiin waalid ku dhashay waddanka dibadiisa. Taasi waxay ka dhigaysaa Australia bulsho dhaqamo-badan.

Australia ma lahan diin rasmi ah ama mid dowladeed. Dhammaan dadka Australia waxay xor u yihiin inay ku dhaqmaan diin kasta oo ay doortaan maaddaama aysan ka-hor-imaanayn shuruucda Australian Commonwealth iyo kuwa dowlad-goboleedyada iyo taritoriyada.

Qiyamka sinnaanta, diimoqaraadiyada, xoriyadda iyo ixtiraamka dadka oo dhan waa waxa mideeya dadka Australia.

Australian Government
Department of Social Services

Oo ay bixisay Haya'dda Caalamiga ee Socdaalka ayadoo ka wakiila Wasaaradda Australia ee Adeegyada Bulshada

IOM • OIM